



Si aad u xakamayso jiirarka, guriga ka saar waxyaabaha soo jiidanaya jiirka oo ay ku jiraan cuntada, biyaha, iyo hoyga jiirka oo baabi'i meelaha ay gurigaaga ka soo galaan

Xakamaynta Jiirka: Kahortag • Ka Saar • Dabin U Sameey




Kahortag

Aqoonso Calaamadaha Dhaqdhaqaaqa

- Saxarada dooliga/jiirka
- Daloolada


iyo calamadaha qaniinyada ee khudaarta, kartoonaada, alwaaxyada, weelasha caaga ah, iyo fiilooyinka

- Calaamadaha xoqidda ah ee dufanta leh ee derbiyada, deyrarka iyo meelaha laga soo galo



Guriga Ka Saar Waxyaabaha Soo Jiita

- Uruuri mirayaasha, lawska iyo khudaarta bislaatay iyo kuwa soo hoobtay
- Daboolka daasadaha iyo weelasha qashinka
- Cuntada ku rid weelasha daboolan ee birta ah marka aad ku kaydinayso garaashyada iyo buushashka
- Cuntada loogu talagalay xayawaanka iyo shinbiraha ee aan la cunin meel fiican ku rid maalin kasta



Baabi'i hoyga dooliga


- Keydadka alwaaxyada ku rasteey meel 12 inji dhulka ka fog
- Dhirta culus, sida bougainvillea iyo ivy, ka fogeey dhismayaasha iyo deyrarka
- Qashinka iyo qubka ka saar daaradaada



Ka Saar

Aqoonso Oo Xir Meelaha Suurtagalka Ah Inay Ka Sii Galaan


- Dayactir ku sameey duleelada ka weyn rubuc adigoo isticmaalay fiilooyinka 18-22 meshka ah ee 1/4 inji ah
- Xir/buuxi dulduleelada albaabbada hoostooda ah adigoo isticmaalaya birta albaabada
- Jar geedaha iyo dhirta u dhow saqafka



Dabinka

Dabino u dhig gidaarada, walxaha gadaashooda, geesaha mugdiga ah ee guriga, iyo hadba meeshii aad ku aragto dhaqdhaqaaqa jiirka

- Xir dabinada si aad uga ilaalisid dabinnada in la jiido
- Dabinta cunto ku rid ilaa dhawr maalmood kahor inta aanad dabinta wax ku qaban; Jiirku waxay bartaan dabinada inay yihiin "ammaan" wayna fududaanaysaa in la qabto
- Iska ilaali in aad guriga ku dhex isticmaasho dabinta sunta lagu rido maxaa yeelay jiirku waxa laga yaabaa in ay ku dhex dhintaan gidaarada, taas oo abuurya ur xun oo soo jiidata duqsiga



Talooyinka Badbaadada

- Saxarada jiirka Ku buufi dareere khafiif ah (9 qaybood oo biyo ah ilaa 1 qayb oo biliij ah) kahor inta aanad nadiifin
- Ka digtoonow markaad dabinnada dhigayso meel u dhow carruurta ama xayawaanka rabaayada ah
- Si taxadar leh u raac dhammaan tilmaamaha ku yaal calaamadaha badeecada dabinta jiirka

Wac kormeerka wax ka barashada BILAASH AH ee jiirka!

Inta lagu jiro kormeerka jiirka, farsamayaqaanku wuxuu:



- Raadin doonaa calaamadaha dhaqdhaqaaqa jiirka iyo meelaha ay ka soo galaan
- Bixin doonaa tilmaamo lagu ciribtirayo deegaanka jiirka iyo dabin u dhigista
- Bixin doonaa xirmada ka hortagga jiirka sida mida halkaan lagu muujiyay

WAC KORMEERKA WAX KA BARASHADA BILAASH AH EE JIIRKA • (858) 694-2888

Jiirka

Jiirku waa cayayaan wax dumiya oo waxyeelleyn kara dhismayaasha iyo fiilooyinka korantada. Waxay sidoo kale sumayn karaan cuntada iyo biyaha waxayna faafin karaan cudurro. Xakameey jiirarka ku jira gudaha iyo hareeraha gurigaaga adiga oo baranaya sida looga hortago, Looga Saaro, Dabina Loogu Sameeyo!

Ka saar Jiirka



Jiirka Saqafyada (Rattus rattus)


- Waa noocyada ugu badan ee jiirka ee laga helo guryaha San Diego
- Wuxuu galaa meelaha dhulka ka sarreeya ee geedaha, saqafyada, iyo saqafka ah

Jiirku wuxuu guryaha ka geli karaa godadka iyo meelaha bannaan ee yar. Raadi oo xir dhammaan meelaha bannaan si aad uga saarto jiirka.



Cabbirka dhabta ah

Raadi Oo Xir Duleelada



KAHORTAG • KA SAAR • DABIN U SAMEEY

Gobolka San Diego



Barnaamijka Xakamaynta
Fektarka

Kahortag

...

Ka Saar

...

Dabinka

Wixii macluumaad dheeraad ah, nagu
soo booqo onlayn ee SDVector.com



GOBOLKA SAN DIEGO

Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka

Barnaamijka Xakamaynta Fektarka

5570 Overland Avenue, Suite 102


San Diego, CA 92123

(858) 694-2888



Jiirka

Kahortag • Ka Saar • Dabin U Sameey



GOBOLKA SAN DIEGO

Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka

Barnaamijka Xakamaynta Fektarka

WWW.SDVECTOR.COM

WWW.SDVECTOR.COM

WWW.SDVECTOR.COM